

RIDE to CARE

Hagaha Gaadiid-raacaha Janaayo 1, 2024



503-416-3955 mise lambarka bilaashka ah **855-321-4899**
8 a.m. ilaa 5 p.m. Isniin ilaa iyo Jimco

ridetocare.com





Jedwalka cinwaanada

Macluumaadka xiriirka iyo saacadaha xafiiska	1
Taageerada luqadda iyo qaabka.....	2
Sirta xubnaha	2
Bayaanka takoor la'aanta.....	3
Dulmarka barnaamijka	4
Adeegaha Daryeelka shakhsiga ahaaneed (PCA).....	6
Gaadiidka dadweynaha	7
Lacag celinta maaafada	9
Gaadiid bixin.....	10
Goobaha farmishiyaha	15
Ka baxsan aagga	16
Gurmada degdegga ah	18
Baaritaanka daraawalka	18
Qorshaha cimilada xun.....	18
Xuquuqahaaga iyo waajibyadaada	19
Lacag bixinta dheeraadka ah	21
Tabashooyin, jawaabcelin, diidmada iyo racfaanada.....	21





Macluumaadka xiriirka iyo saacadaha xafiiska

Macluumaadka xiriirka ee Ride to Care

Taleefonka: 503-416-3955

Lambarka bilaashka ah: 855-321-4899

TTY: 711

Onleenka: ridetocare.com

Ride to Care provides all non-emergent medical transportation (NEMT) services on behalf of your coordinated care organization, Health Share of Oregon.

Saacadaha shaqada iyo fasaxyada ee Ride to Care

Saacadaha shaqada ee caadiga ah: 8 a.m. ilaa 5 p.m. Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo fasaxyada. Inta lagu jiro saacadahaas waxaad dulmari kartaa aqbalaada, waxaad soo gudbin kartaa tabashooyinka waxaadna diyaarsan kartaa gaadiidka baahiyahaaga. Wax kasta oo ka baxsan waqtigaas waxaa loo tixgeliyaa ka dib saacadaha shaqada.

Kooxdayada Adeegga Macaamiisha ee aasaasiga ah lama heli karo maalmahan fasaxa ah: Maalinta Sanadka Cusub, Maalinta Madaxweynayaasha, Maalinta Xuska, Afarta bisha Luulyo, Maalinta Shaqaalaha, Thanksgiving, Habeenka Kirismaska iyo Kirismaska.

Macluumaadka xiriirka Health Share of Oregon

Kooxdayada Adeegga Macaamiisha aas aasiga ayaa la heli karaa saacadaha shaqada ee caadiga ah, 8 a.m ilaa 5 p.m. maalmaha shaqada. Waad wici kartaa si aad u codsato safar ama caawimaad kale oo xagga gaadiidka ah. Waqtiyada shaqada ka baxsan, waxaad la xiriiri kartaa adeegyadeena saacadaha shaqada kadib. Xarunta telefoonka ee saacadaha shaqada kadib waxay bixisaa adeegyo kooban. Waxay kugu caawin kartaa:



- Qabashada safarro caafimaad oo degdeg ah. sida guriga looga baxo isbitaalka ama loo aado heeganka.
- Hubinta qabsashada gaadiid 10 daqiiqo dib u dhici doono.
- Hubinta safarada mustaqbalka ee aad horay u qabsatay.

Cinwaanka: 2121 SW Broadway, Suite 200, Portland, OR 97201

Lambarka: 503-416-8090

Wicitaanka bilaashka ah: 888-519-3845
mise TTY 711

Fakis: 503-416-4981

Internetka: healthshareoregon.org

Hours: 8 a.m ilaa iyo 4:45 p.m. Isniin ilaa jimco, marka laga reebo fasaxyada

Adeegyada waxaa la heli karaa 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii. Waxaad qabsan kartaa ballan gaadiid(safarada) maalin walba iyo waqti walba oo aad u baahato. Fadlan wac xilliyadeena caadiga ee shaqada to si aad gaadiid u qabsato. Keliya safarada caafimaadka degdegga ayaa la qabsan karaa sacaadaha shaqada kadib.

Gaadiidka horay loo qorsheeyay saameyn kuma yeelan doono saacadaha xafiiska ama ciidaha.

Waxaad waqti u qabsan kartaa hal safar ama dhowr safar markii aad na soo wacdo, ugu badnaan 90 maalmood kahor, waqti go'an iyo waqti go'an (celcelis).

Xarunteena wicitaanada saacadaha ka dambeeya waa la heli karaa iyadoo aan loo eegin waqtiga, maalinta ama fasaxa.



Taageerada luqadda & qaababka

Waxaad tani ku heli kartaa luuqado kale, qoraal weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaab kale oo aad jeceshahay. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadaan waa lacag la'aan. Wac 800-224-4840 mise TTY 711.

Puede obtener esta información en otros idiomas, en letra grande, en braille o en el formato que usted prefiera. También puede solicitar un intérprete. Esta ayuda es gratuita. Llame al 800-224-4840 o TTY 711.

Quý vị có thể nhận tài liệu này bằng một ngôn ngữ khác, theo định dạng chữ in lớn, chữ nổi braille hoặc một định dạng khác theo ý muốn. Quý vị cũng có thể yêu cầu một thông dịch viên. Trợ giúp này là hoàn toàn miễn phí. Gọi 800-224-4840 hoặc TTY 711.

Вы можете получить этот документ на других языках, напечатанный крупным шрифтом, шрифтом Брайля или в другом формате. Вы также можете попросить предоставить вам переводчика. Эта помощь бесплатна. Позвоните по тел. 800-224-4840 или TTY 711.

您可以獲得本信函的其他語言版本、大字版、盲文版或您慣用的格式。您也可以申請口譯員。該協助是免費的。請致電 800-224-4840 或聽障專線 711。



Sirta Xubnaha

Sirtaada waa inoo muhiim. Waxaan kaala hadli doonnaa, ama ku siin doonnaa macluumaadkaaga, kaliya marka loo baahdo ujeedooyin ganacsi. Waa mamnuuc (aan la oggoleyn) in haddii kale la sameeyo. Macluumaadkaaga waxay noqon doonaan kuwo ilaalsan sida sharciga qabo.





Bayaanka takoor la'aanta

Health Share of Oregon ma takoorto

Health Share waa in ay raacdaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka iyo federaalka. Ulama dhaqano dadka si cadaalad daro ah mid ka mid ah barnaamijyadeena ama hawlaheena sababo la xiriira qofka:

- Da'diisa
- Midabkiisa
- Naafanimo
- Aqoonsiga Jinsiga
- Xaalada caafimaad
- Xaalada guurka
- Wadankiisa Asalka
- Qowmiyadiisa
- Diintiisa
- Jinsigiisa
- Noociisa jinsi

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu galo, ka baxo, kana faa'iideysto dhismayaasha iyo adeegyada. Waxaad xaq u leedahay in macluumaadka laguugu sheego qaab aad ku fahmi karto.

Ride to Care waxay leedahay shaqaale aqoon u leh adeegga macaamiisha oo ku hadla luqado kale oo aan Ingiriisiga ahayn. Waxaan sidoo kale adiga - ama qoyskaaga, daryeelayaasha ama wakiilkaaga - siineynaa turjubaan marka aad soo wacdo, haddii loo baahdo. Tan waxaa ka mid ah in aad hesho qoraal qaab kale oo adiga kugu habboon (qoraal weyn, cod, qoraalka indhoolayaasha, iwm.).

Adiga ama wakiilkaaga waxaad si bilaash ah ugu codsan kartaan buug-tilmaameedka warqadda ah. Health Share ayaa shan maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood kuugu soo diri doonta.

Haddii aadan ku hadlin Ingiriisiga, waxaa sidoo kale ku jira adeegyada turjumaadda oo lacag la'aan ah iyo macluumaadka qoraalka ah ee ku qoran luqada aad ku hadasho. Waxaan sameyn doonnaa isbedel ku habboon sharciyada, dhaqanka iyo nidaamka annaga oo kaala hadleyna baahiyahaaga.

Si aad u soo gudbiso cabashooyin ama aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir Isuduwaha Cabashooyinkeena qaababka soo socda mid kamid ah:

Health Share of Oregon

Taleefonka: bilaashka ah 888-519-3845 miser TTY 711

Si elekteroonik ah u gudbi dacwadaada:

Internetka: Isticmaal foomka Oregon Health Authority , kuna baxa lix luuqadood halkan: [oregon.gov/oha/OEI/Pages/Public-Civil-Rights.aspx](https://www.oregon.gov/oha/OEI/Pages/Public-Civil-Rights.aspx)

Emayl: civilrights@healthshareoregon.org

Fakis: 503-416-1459

Cinwaan: Health Share of Oregon
Attn: Grievance Coordinator
2121 SW Broadway, Suite 200
Portland, OR 97201

Oregon Health Authority (OHA) Civil Rights

Internetka: [oregon.gov/OHA/OEI](https://www.oregon.gov/OHA/OEI)

limeyl: OHA.PublicCivilRights@state.or.us

Taleefanka: 844-882-7889, 711 TTY

Cinwaan: Office of Equity and Inclusion Division
421 SW Oak St, Suite 750
Portland, OR 97204

Ku sii soco bogga xiga ►

Bureau of Labor and Industries Civil Rights Division

Taleefanka: 971-673-0764

Internetka: oregon.gov/boli/civil-rights/Pages/default.aspx

limeyl: crdemail@boli.state.or.us

Cinwaan: Bureau of Labor and Industries
421 SW Oak St, Suite 750
Civil Rights Division
800 NE Oregon St, Suite 1045
Portland, OR 97232

U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights (OCR)

Internetka: link.careoregon.org/ocr-portal

Taleefanka: Wicitaanka bilaashka ah
800-368-1019 mise 800-537-7697 (TDD)

limeyl: OCRComplaint@hhs.gov

Cinwaan: Office for Civil Rights
200 Independence Ave SW
Room 509F, HHH Bldg
Washington, DC 20201



Dulmarka Barnaamijka

Ride to Care wuxuu bixiyaa gaadiid caafimaad oo aan degdeg ahayn (gurmada deg deg ah ahayn) oo lacag la'aan ah, ama NEMT. NEMT waa manfac loogu talagalay xubnaha u qalma ee ka tirsan Health Share of Oregon. NEMT waxay ku geyneysaa booqashada daryeelka caafimaadka ee ay Health Share bixiso. Booqashooyinku waxay noqon karaan dhakhtar, dhakhtarka ilkaha, la taliyaha caafimaadka dhimirka ama bixiye kale.

Aaga adeegeena laga helo waa Clackamas, Multnomah iyo gobolka Washington.

Ride to Care wuxuu bixiyaa saddex qaab oo laguugu caawinayo inaad hesho daryeelka caafimaadka. Waxaan ugu yeernaa “Safarada”.

- 1. Gaadiidka mareenka dadweynaha:** Waxaan si maalinle ama bil kasta bixinaa Hop Fastpasses. Waxaad qaadan kartaa basaska TriMet, MAX iyo Portland Streetcar. Waxaad kaloo qaadan kartaa gaadiidka kale ee mara aaga sedex- gobolka. Doorashadani waxaad u baahan tahay inaad hesho baska ama tareenka kuugeynaya meesha aad rabto inaad tagto. Haddii aad caawimaad u baahantahaybarashada isticmaalka gaadiidka dadweynaha, nala soo xiriir.
- 2. Lacag celinta masaafada:** Waxaanu bixinaa sicirkii halkii mayl ee masaafada aad safartay

si aad u hesho daryeelka caafimaadka. Ama qof kale ayaa ku qaadi kara. Mararka qaar waxaanu bixinaa gunno (lacag go'an) cuntada iyo hoyga (guri habeenkii ah) haddii aad ka baxdo goobta adeegga. Marka aad dooraneyso inaad qaadata waxaad u baahan tahay qof ku geyn kara ballantaada.

- 3. Gaadiid bixinta:** Waxaan kuu qaban karnaa gaadiid gaar ah iyo mid wadaag ah. Waxaan kuu soo direynaa baabuur ku haboon baahiyahaaga. Taas waxaa ka mid ah qalabka lagu caawiyo dhaqdhaqaaqa.

Uma baahnid in aad lacag bixiso si aad u isticmaasho Ride to Care.

Adeegga macaamiisha wuxuu furan yahay laga bilaabo 8 a.m. ilaa 5 p.m. Isniin ilaa Jimco, marka laga reebo maalmaha fasaxa, si lagaaga caawiyo qabsashada safarada.

Maxaad ka filan kartaa marka aad wacdo Ride to Care

Waxaad kala hadli doontaa kooxda adeegga macaamiisha. Waxaan ogaan doonnaa baahidaada. Kadibna waxaan kaa caawin karnaa inaad hesho adeeg kasta oo ay Health Share lacagteeda bixiso iyadoo u marayso Oregon Health Plan (OHP). Waxay noqon kartaa daryeel caafimaad oo xagga jirka ah, ilkaha ama maskaxda ah, ama daaweynta maandooriyaha.

Waxaan hubineynaa(Xaqiijineynaa) haddii aad u qalanto safarka. Waxaan kaala shaqeyn doonnaa helitaanka safarka saxda ah ee ugu jaban. Waxaan hubin doonnaa in safarka uu k haboon yahay baahidaada.

Adeega macaamiisha wuxuu ku weydii doonaa suaalo sida:

- Sideed rabtaa inaan kuula soo xiriirno? Wakhtigee oo maalinta ah? (Waxaan rabnaa inaan kuu sheegno wax ku saabsan safarkaaga isla markaan diyaarinay. Kahor maalinta safarkaaga, Waan ku soo wici karnaa, fariin qoraaleed, iimayl ama fakis kuu soo diri karnaa.)
- Caadi ahaan side ayaad ku tagtaa ballamahaga daryeelka caafimaadka (wakhtiga loo qoondeeyay adeega caafimaadka)?
- Maku nooshahay meel u dhow meelaha gaadiidka dadweynaha?
- Ma heli kartaa (awood ma u leedahay in aad isticmaasho) gaari?
- Ma isticmaashaa qalabka lagu socdo?
- Ma u baahnaan doontaa caawimaad dheeraad ah?
- Waa maxay isbeddellada gaarka ah (isbedelka) ee ay tahay inaan ku samayno safarka? Tani waxay sabab u noqon kartaa baahidaada, hore ama xaaladaada.

Wakiilkaaga (qofka aad ogolaatay inuu kuu shaqeeyo) ayaa na soo wici kara. Waxay na waydiin karaan safarkaaga. Qofkaasi wuxuu noqon karaa shaqaalaha caafimaadka ee bulshada, waalidka ilmaha xanaaneeya, waalidka ilmaha korsanaya ama bixiyaha. Ama waxuu noqon kartaa qof qaangaar ah wakil kaa ah (doorato)

Ma waxaad xubin ka tahay labada hay'adood ee Health Share iyo Medicaid? Waxaan hubineynaa in aad u baahantahay (u baahan tahay) caawimaad aad ku hesho daryeelka caafimaadka ee Medicaid ama Medicare. Ballanta waxaa laga yaabaa inay ku dhex jirto aagagga adeegeena (Clackamas, Multnomah iyo degmooyinka Washington). Ama waxay ahaan kartaa meel ka baxsan aagagga adeegeena.

Noloshu waxay ka buuxdo isbedel! Caafimaadkaadu ma is bedelay? Gaadiidka aad isticmaasho ma is bedelay? Haddii mid ka mid ah kuwaas uu isbedel ku imaado, ha ahaato mudo gaaban ama mudo dheer, fadlan nala soo xiriir. Waxaan kula shaqeyn doonnaa si aan u helno xulashada ugu fiican ee baahidaada cusub.

Jedwel u dejinta codsiyada

Waqti walba oo aad soo wacdo, macluumaadka soo socda ayaan kaaga baahanahay:

- Magacaaga koowaad iyo magaacaga dambe
- Taariikhda dhalashadaada.
- Lambarkaaga aqoonsiga ee xubin nimada.
- Xaqiijinta cinwaankaaga boostada.
- Taariikhda iyo waqtiga ballanta.
- Ciwaanada bilawga iyo meesha loo socdo oo buuxa
- Magaca xaruunta, magaca dhakhtarka iyo lambarka taleefanka ee dhakhtarka.
- Sababta caafimaad ee ballanta
- Haddi ay tahay safar wareeg ah ama safar hal dhinac ah.
- Haddii aad u baahan tahay kaaliyaha daryeelka shakhsi ahaaneed, ama PCA. (Ka eeg **Bogga 6** macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan PCAs.)
- Haddii aad ku socon karto caawimaad la'aan, ama haddii aad haysato qalabka lagu socdo. Waxa laga yaabaa in aanu ku waydiino haddii aad caawimaad uga baahan tahay darawalka. (Ka eeg **Bogga 13** macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aaladaha lagu socdo.)
- If you use a mobility device, we may ask:
 - Nooca uu yahay (tusaale ahaan, kursiga curyaanka, mooto, biraha ama lugeeyaha).
 - Cabirkiisa.
 - Haddii nooca qalabkaaga socodka uu isbedelay laga soo bilaabo markii ugu dambaysay ee aan ku qaadney.

Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino macluumaad kale, sidoo kale. Waxaan xaqiijin doonaa inaad tahay xubin Health Share iyo in

codsigaagu yahay adeeg ceymis ah ama adeeg la xiriira caafimaadka. Fadlan ogow: Xaqiijinta inaad tahay xubin Health Share ma dammaanad qaadayso in codsigaaga la aqbali doono.

Waxaan oggolaan doonnaa ama diidi doonnaa codsigaaga safarka 24 saacadood gudahood laga bilaabo markii aad nala soo xiriirtay. Haddii ballantaadu tahay 24 saacadood gudahood; waxaan kugu soo wargelin doonnaa go'aankeena ka hor inta aanay noqon. Waxaan rabnaa inaad waqtiga ballantaada ku timaado.

Haddii aan oggolaano safarkaaga (OK) marka aad codsigaaga telefoon ku sameyso, waxaan ku ogeysiin doonnaa, markasta oo ay suurtagal tahay, qabanqaabada (qorshaha). Haddii kale, waxaan ku weydiin doonnaa sida ugu wanaagsan ee aan kula soo xiriiri karno (emayl, telefoon, fariin qoraal, fakis iwm.) Waxaana kuu sheegi doonnaa qorshayaasha safarka isla marka aan ogaano. Tani waxay ka horrayn doontaa ballantaada.

Health Share ama Ride to Care ayaa ku siinaya macluumaadka safarkaaga ugu yaraan laba maalmood kahor waqtiga ballantaada, haddii ay suurtagal tahay. Macluumaadka ku saabsan qabanqaabada safarka waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn:

- Magaca iyo lambarka taleefanka darawalka ama bixiyaha gaadiidka. Tan waxaa loo isticmaali karaa oo kaliya in lagu xiriiro darawalka safar horay loo qorsheeyay, looma isticmaali karo in lagu qabsado safar mustaqbalka ah. Haddii aad dalbaneyso safar ka yar laba maalmood ka hor waqtiga lagu qabtay, waxaa laga yaabaa inaan awoodin

inaan ku siino faahfaahintaas. Waqtiga la qabtay iyo ciwaanka laga qaadaayo.

- Magaca iyo cinwaanka daryeel-bixiyaha caafimaad ee aad u tagto. Xubin Health Share ahaan mas'uul kama tihid inaad go'aamiso in qorshaha safarka la sameeyay iyo in kale.

Ogsoonow in darawallada aysan bedeli karin waqtiga lagu soo qaadayo iyadoo aysan jirin oggolaansho hore oo dukuminti ah oo ka yimid Health Share ama Ride to Care.

Ma u baahantahay inaad bedesho waqtiga qaadista ama macluumaadka kale ee safarka?

Fadlan na soo wac. Waxaan ogeysiinaynaa bixiyaha gaadiidka.

Faahfaahin dheeraad ah ka sii aqr **Bogga 7-15**, oo ku saabsan saddexda nooc ee gaadiidka (safarka) ee la bixiyo: gaadiidka dadweynaha, magdhawga masaafada iyo gaadiidka la bixinta.

Xubnaha barnaamijka ilkaha ee halyeeyayada iyo Ururka xurta ah ee isku xiran (COFA)

Haddii aad xubin ka tahay barnaamijka dhakhaatiirta ilkaha ee qadiimiga ah ama barnaamijka dhakhaatiirta ilkaha ee COFA ("Ilkaha OHP"), Ride to Care waxay bixisaa oo keliya safarro bilaash ah oo aad ku tagto ballamaha dhakhtarka ilkaha. Ride to Care ma bixiso safarro lacag la'aan ah adeegyada kale ee caafimaadka haddii aad xubin ka tahay barnaamijyadaas. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan caymiska iyo faa'iidooyinka la heli karo, la xiriir Adeegga Macaamiisha Health Share lambarka 888-519-3845 ama TTY 711.



Kaaliyaha daryeelka Shakhsiga (PCA)

Kaaliyaha daryeelka shaqsigah (PCA) waa caawiye la socda xubin si uu u tago booqasho daryeel caafimaad oo la caymis ah. PCA-gu wuxuu ku caawiyaa kahor, inta lagu jiro iyo kadib booqashadaada. Waxay kaa caawinayaan waxyaabo ay ka mid yihiin:

- Jaranjarooyinka
- Qalabkaaga socodka
- Turjubaanada luqadda
- Kormeerka caafimaadka (Isha ku haynta qalabka)

PCA-gu wuxuu noqon karaa hooyada xubinta,

aabaha,adeerka hooyadaa qabo, awoowe ama waalidka masuulka. Ama waxay noqon kartaa qof qaangaar ah oo 18 sano jir ah ama ka weyn. Waa I Waalidka ama qofka masuulka ka ah xubinta ka ah uu oggolaadaa iyaga.

Anaga ama Health Share waxaan u baahan karaan in waalidka ama masuulka uu ku ogolaado qoraal ahaan. Waxaan go'aamin doonaa haddii xubinkuu u baahan yahay caawimaad iyo in adeegahaagu uu buuxiyo shuruudaheena.

Haddii aad u baahantahay PCA kuula safra booqashadaada daryeelka caafimaadka, noo sheeg marka aad soo wacdo si aad caawimaad uga codsato safarka. Waxaan hubineynaa in uu qofku buuxiyo shuruudaha, sida ay soo saartay

shaqaalaha gaadiidka ee gobolka Oregon ee u qaabilsan gaadiidka carruurta iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba ee link.careoregon.org/oard-transportation-attendants

Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano waa inuu la socdaa qof qaangaar ah. Caawiyuhu wuxuu noqon karaa hooyada, aabaha, eedaadaa oo aabahaa qabo, adeerka hooyadaa qabo, awoowe ama waalidka masuulka ah. Sharciga la xiriira caawiyuhu wuxuu sidoo kale khuseeyaa xubnaha Health Share ee da' kasta leh haddii ay qabaan baahiyo gaar ah oo xagga jirka ama koritaanka ah.

Wakiilku waa in uu raacaa xubinta labada safar ee qaadista iyo soo celinta. Wax lacag ah kama qaadeyno caawiyuhu inaan qaadno.



Gaadiidka dadweynaha

Haddii aad raaci karto gaadiidka dadweynaha, waxaan ku siin karnaa lacagta gaadiid raaca safarka. Waxaa laga yaabaa in aan u baahano inaan ka xaqiijino (hubinno) rugta caafimaadka inaad waqti ballan qabsatay waqtigaas.

Markii aad na soo wacdo, waxaan kula dulmareynaa ballamahaaga daryeelka caafimaadka. Fadlan diyaar u noqo inaad noo sheegto ballamaha mustaqbalka ee baaritaanka jirka, ilkaha iyo caafimaadka maskaxda, ama ka daaweynta isticmaalkamaandooriyah.

Taleefanka ayaa waxaa kugu weydiin doonaa Macluumaadka laguugu qabanaayo safarka. Eeg "Waxa aad filan karto marka aad soo wacdo Ride to Care" **Bogga 4** ee macluumaadka aan u baahanahay.

Waxaa sidoo kale weydiinaa:

- Haddii aad u baahantahay kaarka safarka ee qofka caawiyaha ah (PCA).
- lambarka kaarkaaga Hop Fastpass oo buuxa, haddii aad haysato mid aan hay'ad kale maamuleynin, iyo in tan ay tahay markii kuugu horeysay ee aad na soo wacdo.
- Cinwaankaaga boostada.

Doorashooyinka gaadiidka maxaliga

Waxaa jira dhowr nooc oo gaadiidka dadweynaha ah oo aan bixin karno lacag raaca gaariga. Noo sheeg midka aad u isticmaali laheyd ballantaada daryeelka caafimaadka.

Waxaan sidoo kale gaadiid raaca kuugu soo diri karnaa:

- TriMet buses
- Portland Streetcar
- TriMet MAX
- Vancouver C-Tran

Waxaan sidoo kale gaadiid raaca kuugu soo diri karnaa:

- Canby Area Transit
- Sandy Area Metro
- South Metro Area Regional Transit
- South Clackamas Transportation District

Mareenka Bilaha iyo malinlaha

Waxaan go'aamin doonaa (go'aansan doona) haddii kaadhka maalinta ama kaarka bilaha ahi ay kugu habboon yihiin.

Waxaan ku soo shubi doonaa gaadiid raaca maalin laha ama bilaha kaarkaaga **TriMet Hop Fastpass.**

Haddii aad shan jeer ama ka badan ballan kuu taasho bil gudaheed, waxaad xaq u leedahay (u qalmi kartaa) kaarka TriMet ee billaha ah.

Hal mar oo kaliya miyaa ballan leedahay? Weli na weydii in aad u qalanto kaarka bilaha. Haddii aad aad haysato kaarka muwaadinka sharafta leh ee TriMet, waxaad u baahantahay hal ballan oo kaliya.

Wakhtiyada aad u baahantahay in aad maskaxda ku hayso

- **Ma waxaad weydiisanaysaa kaarka safarka ee bilaha?**

Wac inta u dhaxaysa 15-ka bisha ka hor ballantaada daryeelka caafimaadka iyo 10-ka bisha ballantaadu ay ku aadantahay.

- **Ma waxaad soo wacaysaa wixii ka dambeeya 10-ka isla bisha aad ballanta leedahay?**

Waxaan ku siineynaa kaarka safarka maalinlaha ah, xitaa haddii aad shan jeer ama ka badan ballan qabsato. (Haddii aad haysato kaarka muwaadinka sharafta leh mooyee.)

Tusaalaha 1:

Waxaad dooneysaa kaarka bilaha TriMet ee bisha Abriil Waxaad na soo wacdaa wixii ka dambeeya 15-ka Maarso iyo ka hor 10-ka Abriil. Wax nooga sheeg shantii kulan ee aad qabtay Abriil. (Ama, haddii aad haysato kaarka Muwaadinka Sharafta leh, waxaad noo sheegtaa ugu yaraan hal kulan bisha Abriil.)

Waxaad u qalantaa inaad hesho kaarka bilaha Abriil.

Example 2:

Waxaad leedahay shan kulan dhamaadka bisha Abriil. Waxaad na soo wacdaa 11-ka Abriil waxaadna na weydiisataa lacagta gaadiid raaca ee ballamahan.



Waxaad u qala ntaashan maalin oo TriMet ah. Haa, waxaad leedahay shan kulan bil gudaheed. Laakiin **uma** qalantid in aad hesho kaarka bilaha. Sababtoo ah nama soo wicin kahor **10kii Abriil** Marka xigta, fadlan waqti hore na soo wac si aad u uga dib dhicin waqtiga kama dambeysta ah ee kaarka bisha.

Kaararka Hop

Ma haysataa kaarka safarka ee Hop Fastpass (kaar mareenka lacagta gaariga ee Hop)?

Waxaan ku shubi karnaa kaarka lacagta gaadiidka ee TriMet maalin kasta iyo bil kasta. (Laakiin ma awoodno in aan lacag kuugu shubno kaarkaaga Hop haddii koox kale ay kaarkaas adiga kuu maamusho. Taas bedelkeed, waxaan kuugu soo diri doonnaa kaarka cusub ee Hop.)

Waxaan kuugu soo diri doonnaa kaarkaaga HOP haddii aadan horay u lahayn.

Ride to Care waxay isticmaashaa oo kaliya kaararka Hop si ay kuu siiso lacagta gaadiidka ee aagga adeegga TriMet. Laga bilaabo Janaayo 1, 2020, TriMet ma aqbasho kaararka warqadda ama tigidhada lagu iibsaday barnaamijkeeda tigidhada.

Ma waxaad u safraysaa meel ka baxsan aagga adeegga TriMet? Waxaan bixin doonnaa qaabka maxalliga ah ee la aqbali karo ee lacagta gaadiidka.

Waqtiyada soo dirista iyo lacag ku soo shubida

Waxaan u baahanahay waqti aan kuugu keeno tikidhada safarkaaga. Waxaan dooneynaa in aad hesho lacagta aad u baahan tahay ka hor maalinta aad ballanta leedahay. Sidaa darteed, fadlan nala soo xiriir waqti hore!

- **Haddii aad u baahantahay kaarka dadka waa weyn ama dhalinyarada ee Hop Fastpass:** Na soo wac shan ilaa todobo maalmood oo maalmaha shaqada ah kahor waqtiga ballantaada. kaarka wuxuu ku soo dhici doonaa boostada.
- **Haddii aad u baahantahay lacagta gaadiid raaca ee aan ahayn TriMet:** Na soo wac shan ilaa todobo maalmood oo maalmaha shaqada ah kahor waqtiga ballantaada. Lacagta waxaa laguugu soo diraa boostada.
- **Haddii aad rabto in lacagta gaadiidka laguugu soo daro kaarka Hop-ka:** Na soo wac ugu yaraan 48 saacadood kahor waqtiga ballantaada. Waxaan cusbooneysiin doonnaa haraaga lacagta kaarkaada Hop.



Muwaadinka sharfan iyo lacagta gaadiidka ee dakhliga yar

Haddii aad u isticmaasho TriMet ama C-Tran safarada aad ku tagto Waqtiyada ballanta, fadlan dalbo muwaadinka sharfan ama Lacagta gaadiidka ee dadka dhaqaalaha-yar ee Hop Fastpass (kaarka Hop). Dhammaan xubnaha isticmaala Ride to Care waxay u qalmaan kaarka lacagta gaadiidka jaban. Ka codso xafiiska TriMet ee Pioneer Courthouse Square, 701 SW Sixth Ave, Portland.

Booqo mareegtada TriMet' si aad u hesho macluumaad dheeri ah: trimet.org/lowincome

Miyuu daryeel-bixiyuhu (PCA) kuula soo safri doonaa ballantaada?

Marka aad dalbaneyso lacagta gaadiidka kirada ee muwaadinka sharafta leh ama kuwa dakhligoodu hooseeyo, hubi inaad u sheegto TriMet wax ku saabsan PCA-gaaga. (Faahfaahin dheeraad ah hoos ka eeg.)

Markii aad buuxiso codsigaada, TriMet ayaa sawiro kaa qaadi doonta. TriMet waxay ku siinaysaa kaarka TriMet Hop oo sawirkaaga saaran. Markaas waxaad na weydiin kartaa lacagta gaadiidka ee dadka dakhligoodu yar yahay ama muwaadiniinta sharafta leh ee TriMet iyo C-Tran.

Haddii aad u baahan tahay kaaliyaha daryeelka gaarka ah inuu ku raaco gaadiidka dadweynaha:

1. U sheeg kooxda adeegga macaamiisha marka aad soo wacdo inaad weydiiso lacagta gaadiidka safarka.
2. U sheeg shaqaalaha TriMet marka aad codsaneyso kaarka HOP ee Muwaadinka Sharaf leh. (Haa, waxaad u qalantaa in aad hesho kaarka muwaadinka sharafta leh.)
 - TriMet waxay ku dari doontaa "A" - kaaliyaha - kaarkaaga Hop ee muwaadinka sharafta leh.
 - Marka aad heysato Kaarka HOP ee Muwaadinka Sharafta leh ("A"), TriMet waxay kuu ogolaanayaa daryeele shaqsiyeed in uu ku raaco adiga oo aan wax lacag ah kaa qaadin.
 - Ma haysataa kaarka sharafta ee muwaadinka oo aan ku qorneyn A? Fadlan siu ga dhakhsiyaha badan ka dalbo xafiiska dalbo TriMet in laguugu bedelo Kaarka muwaadinka sharafta leh. U sheeg TriMet in aad u baahantahay u u ku raaco caawiye.

Waxaan si ku meel gaar ah u bixin karnaa lacagta gaadiidka inta aad dalbaneyso ama aad cusbooneysiineyso kaarkaaga HOP ee muwaadinka sharafta leh si aad ugu darto kaaliyahaaga.



Lacag celinta masaafada

Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu ku geyn karo ballamahaaga daryeelka caafimaadka, waxan kuu soo celin karnaa (lacagta aad bixineyso) Km-yada aad waday.

Markii qof kale uu kuu kaxeeyo mise kaa soo kaxeeyo ballamahaaga, waxaan ku siineynaa lacagta magdhawga. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad lacagta siiso qofkii ku siiyay gaariga.

Waa kuwan tallaabooyinka ay tahay inaad qaadatid.

1. Nala soo xiriir Ride to Care si aad u ballansato safarkaaga. Haddii ay suurtoagal tahay, ugu yaraan laba maalmood oo shaqo ka hor waqtiga ballantaada wac. Tani waxay na siineysaa waqti aan ku xaqiijino macluumaad

ka hor ballantaada. Waa in aan sameynaa tan ka hor inta aanan oggolaanin codsigaaga. Waxaa dhivi karta inaad wacdo 90 maalmood kahor waqtiga ballantaada. Haddii aad wacdo isla maalinta ballantaada, weli waxaa lagu oggolaan karaa lacagta. (Ka eeg **Bogga 10** qaybta Kaarka Focus.)

2. Lacagtaada ha lagu soo celiyo. Markaan xaqiijino ballantaada, waxaan kaarkaaga U.S. Bank Focus ku soo shubi doona lacag celinta masaafada. Kaarka Focus waa kaarka deynta ee Visa® oo horay loo bixiyay, oo laga bixiyo U.S. Bank Waxaan lacagta ku shubeynaa 14 maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood laga bilaabo marka la helo foomka aad buuxisay.

Kaararka Focus

Marka ugu horeysa ee aad dalbato lacag celinta, waxaan kuu sameynaynaa koonto aad ku isticmaasho kaarka deynta ee Focus. Waxaan kuu soo diri doonaa kaarkaaga. waxay qaadan kartaa 7 ilaa 10 maalmaha shaqada si uu kuu soo gaaro Kaarka Focus-ka wuxuu ku jiri doonaa baqshad aan calaamad lahayn. Waxay u ekaan kartaa boostada aan loo baahnayn, markaa fadlan fiiro gaar ah u yeelo.

Ku llaalso kaarkaaga Focus meel nabad ah. isla kaarkaas ayaa dib ugu soo shubi doonaa lacag celinta mustaqbalka.

Ka hor inta aadan isticmaalin kaarka, waa inaad furtaa kaarka. Tilmaamaha waxay ku jiraan kaarka. Waxaad kaarka ku isticmaali kartaa goob kasta oo ay ka shaqeeyaan shirkadaha Visa.

Sicirka lacag celinta iyo haraaga

Lacag celintaada masaafada waxaa laguugu soo shubi doonaa kaarka Focus-ka sicir ah \$0.67 halkii

meeyl. Waxaanu ku dari doonaa lacag celinta Kaarkaga Focus ka dib marka lacagta la bixinayo ay gaarto \$10 ama ka badan. Haraaga kaarka ku jirta waxay u gudubtaa bil ilaa bil kale.

Haddii kaarkaaga aan la isticmaalin muddo lix bilood ah, wuxuu noqonayaa mid aan shaqaynayn. Waxaad u baahantahay in aad na waydiiso in aan dib u howlgelino kaarkaaga Focus ka hor intaadan helin lacagta.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan haraaga kaarkaaga, ka bixitaankiisa ama dib u hawlgelintiisa, fadlan wac Adeegga Macaamiisha kaarka Focus lambarka lacag la'aanta ah 877-474-0010.

Haddii aad u baahan tahay hab kale oo aad lacagta kuugu soo celino oo aan ahayn kaarka Focus, nala soo xiriir. Na weydiiso hooy (bedelaad ama ka reebid).

Kaarka Focus waxaa bixiya U.S Bank national Association sida waafaqsan liisanka xubinta Visa U.S.A. Inc. ©2022 U.S Bank FDIC.



Baabuur bixinta

Waxyaabaha aasaasiga ah ee ku safridda gaadiidka

Markii aad soo wacdo si aad safar u dalbato, waxaan ku weydiinaynaa su'aalo. Waxaan rabnaa in aan hubino in aad hesho gaadiidka saxda ah.

Haddii aan qabaneyno gaadiid, waxaan weydiineynaa macluumaad sida:

- Cinwaanka laga bilaabo iyo cinwaanka loo socdo oo buuxda. Waxaa ku jira guriga, qolka, dhismaha, dabaqa ama lambarka qolka.
- Talooyin waxtar leh oo ku saabsan meesha aad ka soo qaadeyso baabuurkaaga. Miyay jiraan jaranjarooyn? Miyay tahay meel bannaan?
- In aad la safri doonto qof ku caawiya ama xayawaan ku caawiya.
- Haddii aad isticmaaleyso qalabka lagu socdo. Haddii aad tahay, waxaan ku

weydiin karnaa:

- Nooca qalabka.
- Cabirka qalabka.
- Heerka adeeg ee aad u baahanatayahay (Eeg **Bogga 12**).
- Haddii aad u baahantahay in lagu kaxeeyo safarka iyo waqtiga aad u baahantahay.

Haddii aad awoodo, fadlan na soo wac ugu yaraan 48 saacadood kahor waqtiga ballantaada. Ogaysiiska horay u sii socdaa wuxuu nagu caawiyaa jadwalka. Waad na soo wici kartaa ugu dambeyn 90 maalmood kahor waqtiga ballanta.

Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato in lagu kaxeeyo isla maalintaas ama maalinta ku xigta. laakiin hadii baahida loo qabo gaadiidku ay badato. waxaan mudnaanta koowaad siinaa codsiyada caafimaad ee degdega ah. waxaad faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan codsiyada isla maalintaas iyo maalinta ku

xigta. Waxaad faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan codsiyada isla maalintaas iyo maalinta ku xigta ka heleysaa **Bogga 12**.

Waxaan kuu qabsan karnaa ballan gaari haddii aad:

- Inaad gaari heli karin.
- Aan raaci karin gaadiidka dadweynaha.

Waxaan soo diri karnaa baabuur isugu jira kuwa curyaamiinta ah, kuwa la saari karo gaariga curyaamiinta, kuwa gaadiidka la raaco ama kuwa aan degdeg ahayn. Waxaan go'aan ka gaareynaa baahidaada caafimaad. Haddii loo baahdo waxaa kuu raaci kara daryeel bixiye (PCA).

Darawallada waa in ay kuu sheegaan in ay joogaan marka ay yimaadaan. Waa inay sugaan ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib waqtiga lagu qabtay in lagu qaadi doono. Haddii aadan ku imaan 15 daqiiqo gudahood, darawallada waa inay u sheegaan soo diraha ka hor inta aysan ka tagin goobta lagaa qaadi rabay.

Mar kasta oo ay suurtagal tahay, na soo wac ugu yaraan laba maalmood oo shaqo ka hor intaadan u baahanin gaadiid.

Waxaan kuu qabaneynaa jadwalka safarkaaga si aad waqtiga ugu soo gaarto ballantaada. Waxaan kuu qabaneynaa jadwalka safarkaaga si aan kuugu soo qaadno si degdeg ah ballantaada kaddib.

Fadlan diyaar u noqo inaad baxdo marka uu darawalku yimaado. Darawalkiinu miyuu goor hore yimid, oo miyaanad diyaar ahayn? Looma baahna in aad tagto ka hor waqtiga ama daqiiqadda aad soo qaadaneysa.

Tilmaamaha kale ee waqtiga:

- Darawalkaagu waa in uu yimaadaa ugu dambeyn 15 daqiiqo ka dib waqtiga ay tahay in lagu qaado.
- Waa in aan lagu gaarsiin wax ka badan saacad kahor waqtiga ballantaada.

- Waa inuu daraawalka ku keenaa ugu yaraan 15 daqiiqo kahor waqtiga aad ballanta.
- Waxaan leenahay qorsheyaal xaaladaha degdegga ah iyo qorsheyaal gurmada ah oo ku saabsan xaalado kala duwan oo saameyn ku yeelan kara helitaanka gaadiidka. Waxyaabaha waxaa ka mid ah gaadiidka faraha badan, shilalka baabuurta iyo weath cimilada oo xumaanaysa iyo xubnaha kale ee ka daahaya ballamaha.
- Waxaan ku dadaali doonnaa sida ugu fiican ee aan u bixin karno xulashooyin gurmada ah si xubnaha loogu qaado iyo dib loogu celiyo ballamhooda. Haddii loo baahdo adiga iyo daryeel bixiyahaaga caafimaad ayaan kala shaqayn doonnaa si aan u hubinno inaad ballantaada gaadho. Waxaa laga yaabaa in aan u baahannahay in aan safarkaaga u wareejino bixiye kale oo gaadiid. **Isla markiiba noo sheeg haddii uusan darawalku ku soo gaarin 10 daqiiqo gudahood waqtiga aad soo qaadaneysa ama daqiiqada aad soo qaadaneysa.**
- Daraawalada waa in aysan ku geyn goobta aad ballanta ku qabsato wax ka badan 15 daqiiqo ka hor inta aan la furin rugta caafimaadka ama xarunta kale (haddii aadan adiga ama wakiilkaaga codsan in aad horay u tagto).
- Daraawalada looma oggolo inay ku sii daayaan ballanta wax ka yar 15 daqiiqo ka hor inta aysan xafiiska ama xarunta kale u xirmin shaqada (haddii aadan adiga ama wakiilkaaga codsaneyn inaad ka hor timaado).
- Haddii ballantaadu ay tahay maalinka u dambeygaadiidleyda ayaa soo kaxaynaya 15 daqiiqo gudahood marka uu rugta caafimaadku xirmo. Tani waxay dhacdaa marka laga reebo haddii ballanta la filayo inay qaadata wax ka badan 15 daqiiqo marka la xirayo, ama haddii aan adiga ama (sida ay khuseyso) waalidkaaga, masuulkaaga ama wakiilkaaga codsan.

- Darawalku looma oggola inuu gaariga joojiyo meel aan horay loo qorsheynin oo ay ku kujirto cuntada iyo cabitaanada, inta aad ku sii jeedo ama ka soo laabanayso goobtaada daryeelka caafimaadka ee deegaankaada.

Haddii aadan hubin waqtiga aad u baahantahay in aad guriga tageysid marka aad ballanta ka soo laabanaysid waxaad Qabsan kartaa waqtiga dardaaranka, ama wicitaanka soo noqoshada. Markii aad dhameysato ballanta, wac lambarka telefoonka 503-416-3955 (855-321-4899 oo lacag la'aan ah). Darawalku wuxuu imaanayaa 60 daqiiqo gudahood laga soo bilaabo waqtiga aad wacday.

Si looga fogaado dib u dhac, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad jadwal u sameyso waqtiga qaadista markasta oo ay suurtagal tahay.

IHaddii aad u baahato inaad joojiso ama bedesho safarka ka dib markii aad ballansatay, fadlan noo sheeg sida ugu dhakhsaha badan. Waxaan u baahanahay ugu yaraan labo saacadood intaanad imaanin. Waxaa laga yaabaa inaanan awoodin si aan ula qabsanno isbedelada daqiiqada ugu danbeysa, laakiin marwalba waxaan sameyn doonaa sida ugu fiican.

Soo daahida gaadiidka iyo dib u qabashada

Mararka qaar gaadiidku wuu soo daahayaa ama kuma soo qaadi karo sababo la xiriira taraafikada ama sababo kale awgood. Haddii gaadiidkaagu uu daahay, ama ay jiraan dhibaatooyin kale, fadlan na soo wac. Waxaan safarkaaga u wareejin doonaa bixiye kale sida ugu dhakhsaha badan. Waxaan la shaqeynaa shirkadaha gaadiidka si aan u hubino in gaadiid dheeraad ah la heli karo.

Codsiyada isla maalintaas iyo maalinta ku xigta

Waxaan kaa codsaneynaa in aad na soo wacdo ugu yaraan laba maalmood oo maalmaha shaqada ah ka hor ballantaada daryeelka caafimaadka ogeysiiska labada maalmood ah ayaa naga caawin doona inaan si fiican kuugu adeegno waqtiyada baahida badan.

Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato gaadiid isla maalintaas ama maalinta ku xigta.

Waxaa laga yaabaa in aan xaqiijino safarada isla maalintaas ee bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Waa tan sida aan u kala saarayno codsiyada safarka isla maalintaas:

- Isbitaalka ayaa lagaa saaray.
- Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa ku weydiinaya in aad isku maalin u timaado xaalad halis ah. Waxaa ka mid noqon kara gaadiidka loogu tala galay baaritaanka shaybaarka ama tijaabooyinka kale.
- Waxaad u socotaa daryeelka degdegga ah sababtoo ah waad xanuunsan tahay daryeel-bixiyahaaga daryeelka aas aasiga ahna lama heli karo.
- Waxaad leedahay uur waxaadna u baahantahay in aad la kulanto dhakhtarkaaga uurka, ama aad tagto xarunta daryeelka degdegga ah.
- Bixiyahaaga daryeelka aas aasiga ayaa kuu diri doona takhasus
- Waa inaad isla markiiba soo qaadataa daawo aad u baahan tahay.

Sababaha kale oo dhan awgood, fadlan dalbo safarka ugu yaraan laba maalmood oo shaqo kahor waqtiga ballantaada. Adiga ama wakiilkaaga waxaad waqti ka qabsan kartaan safarro badan oo hal wicitaan telefoonka ah, ugu badnaan 90 maalmood kahor waqtiga ballantaada. Adeegyada waxaa la heli karaa 24-ka saacadood maalintii, 365-ka maalmood sannadkii.

Haddii saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah uu ku geyn karo ballantaada, waxaan oggolaan karnaa magdhawga masaafada isla maalintaas. Haddii aad isticmaali karto gaadiidka dadweynaha, waxaan oggolaan karnaa lacagta gaadiidka gaadiidka dadweynaha.

Heerka adeega

Darawaladeenu waxay bixin karaan adeegyo kala duwan si ay ugu haboonaadaan baahidaada caafimaad.

- **Cirif-ku-cirif:** Darawalkaagu wuxuu kugula kulmi doonaa cidhifka goobtaada.
- **Albaab-ku-Albaab:** Darawalkaagu wuxuu kula kulmi doonaa albaabka ama miiska hore ee goobtaada. Daraawalka ayaa yaa ku galbin doona albaabka ama miiska hore ee meesha aad ka dejisay.

- **Gacan-kugacan:** Darawalka baabuurka ayaa adiga iyo xubin ka mid ah kooxda daryeelkaaga kugula kulmi doona goobta lagaa qaadaayo. Darawalka ayaa kugu geyn doona gudaha meesha aad rabto in aad tagto. Darawalka ayaa kula joogi doona illaa uu qof ka tirsan kooxda daryeelkaaga kugeyo inta ka harsan wadada. Qof daryeele ah, ayaa haddii la heli karo, ka caawin kara adeegan.

Marka aad na soo wacdo si aad u ballansato safar, fadlan noo sheeg nooca caawimaadda aad u baahan tahay.

Qalabka Socodka

Qalabka socodka waa shey kaa caawiya inaad dhaqdhaqaaqdo. Waxaa muhiim ah in aan ogaano haddii aad isticmaasho mid, waa maxay cabirkiisa, iyo haddii aad caawimaad u baahan tahay saaridda iyo ka soo dejinta baabuurka. Haddii aad isticmaasho usha, birta lagu socdo, kursiga curyaamiinta ama mootooyinka curyaamiinta ah, ama aad u baahantahay gaadiid laami ah, waxaan ku geyn karnaa ballantaada.

Waxaan kuu soo bandhigi karnaa gaadiid ku haboon qalabkaaga socodka, laakiin gaadiid kastaa ma qaadi karo nooc kasta oo qalab ah. Waxaan dooneynaa in aan kuu soo dirno baabuurka sida ugu haboon baahidaada. Haddii gaari uusan ku habooneyn baahiyahaaga, si degdeg ah noo soo wac.

Markii aad soo wacdo, noo sheeg nooca iyo cabirka qalabkaaga dhaqdhaqaaqa, iyo faahfaahin kasta oo gaar ah.

Macluumaadyada muhiimka ah ee ku saabsan qalabkaaga socodka waxaa ka mid noqon kara:

- Haddii uu isku laab maayo
- Baaxadda iyo dhererka qalabka.
- Miisaanka isku darka ah ee qalabka marka la isticmaalo
- Haddii uu dhabarka sare leeyahay ama uu fadhiyo.



Saaladda ama haddii aad u baahato in lagu siiyo kursiga curyaamiinta xilliga safarka, waxaan u baahnaan doonaa inaan ogaano dhererkaaga iyo miisaankaaga si aan kuugu soo dirno cabbirka kugu habboon.

Oksijiin ayaa sidoo kale waa la bixin karaa xilliga safarka. Marka aad qabsaneysid safarkaaga, noo sheeg tirada litirka oksijiinta ee aad u baahan tahay. Haddii aan ku siino qalabka socodka ama oksijiin, kaagama tageyno goobta aad ku dageyso. Waxaa la isticmaali karaa oo kaliya inta lagu guda jiro safarka. Hubi inaad u qorsheyneyso waxyaabaha aad u baahan tahay cinwaanka gurigaaga iyo waqtiga ballantaada.

Haddii aad isticmaasho saalad, darawalka baabuurka ayaa ku weydiin kara inaad u wareejiso kursiga gaariga badbaadadaada awgeed Laakiin laguguma qasbo inaad sameyso sidaas.


Qalabka caawimaadda socodka sida biraha ama usha waa in si ammaan ah loo dhigaa gaariga ka dib markaad fadhiisato. Haddii loo baahdo, wuxuu kaa caawinayaa inaad qalabkaaga ilaalisid.

Caagadaha oksijiinta ee la qaadi karo waa in la ilaaliyaa inta la wado. Fadlan keena oo kaliya oksijiin kugu filan oo aad u baahantahay.

Haddii baahiyahaaga ama qalabkaaga socodka uu isbedelo, fadlan noo sheeg.ur.

Xayawaanada Adeega

Waxaad la imaan kartaa xayawaan adeega inta aad safarka ku jirto. Xayawaanka adeegu waa aad u



baahantahay naafanimadaada awgeed. Xayawaanka waxaa loo tababaray in uu sameeyo shaqo ama uu qabto hawlo adiga oo ah qof laxaadka la'. Wax dheeraad ah ka sii aqri xayawaanka iyo Americans with Disabilities Act (ADA) at link.careoregon.org/ada-service-animals

Xayawaanka taageerada dareenka, xayawaanka saaxiibka ah iyo xayawaanka rabaayadda ah looma oggola gaadiidkeena, marka laga reebo kuwa xiran.

Hadii aad dooneysaan in xayawaan adeegeed idinla socdo, fadlan noo sheeg marka aad soo wacdaan si aad u ballansataan safarka. Shaqaalaha adeegga macaamiisha iyo darawalada baabuurta ayaa ku weydiin kara su'aalaha soo socda ee ku saabsan xayawaankaaga adeegga:

- Waa xayawaan noocee ah?
- Xayawaanku ma loo baahan yahay naafanimi darteed?
- Waa maxay shaqada loo tababaray xayawaanka?

Adeegga macaamiisha iyo darawallada waxay waydiin karaan su'aalahaas oo keliya. Waxaad xaq u leedahay in aad heysato macluumaadkaaga caafimaad ee gaarka ah. Qasab kuguma aha inaad bixiso (siiso) wax macluumaad ah oo ka baxsan saddexdan su'aalood.

Suumanka badbaadada

Dhamaan wadayaasha baabuurta waa inay raacaan xeerarka suunka badbaadada. Markii aad soo wacdo si aad ballan uga qabsato safarkaaga, fadlan noo sheeg haddii aad u baahantahay in lagu dheereeyo suunka. Haddii aad haysato kaarka Meesha ka saraayo suunka badbaadada, fadlan na soo wac si aan uga hadalno sida ugu wanaagsan ee aan kugu caawin karno. Rakaabka isticmaala kursiga curyaamiinta wa in ay isticmaalaan suumanka caloosha hoosteeda iyo garabka.

Gaadiidka wadaagga ah

Rakaabka looma damaanad qaadaayo in gaadiidku yahay mid gaar loo leeyahay wuxuuna noqon karaa mid wadaag ah. Rakaabka kale ee NEMT ah waxaa laga yaabaa in lagu qaado ama lagu dejiyo jidka aad u socoto. Waxaan kaa codsaneynaa inaad marwalba dadka kale ula dhaqanto si sharaf leh. Ha u dhaqmin qaab khatar badbaado u keeni karta mid ka mid ah kuwa gaariga la socda.

Secure transport

Marka xubin uu ku jiro xaalad caafimaad oo maskaxeed, nooca ugu habboon ee gaadiidka ayaa noqon kara gaadiid caafimaad oo aamin ah oo ku jira gaari gaar ah. Taas macnaheedu waa in dhakhtar ama sarkaal nabadeed uu go'aamiyay in xubinku uu halis ku jiro in uu naftiisa ama dadka kale waxyeelleeyo, ama uu u baahan yahay daryeel degdeg ah, ilaalin ama daaweyn.

Haddii ay caafimaad ahaan ku haboon tahay, xubinta waxaa la socon kara qof kale, si uu u siiyo daawada safarka ama uu u buuxiyo shuruudaha sharciga ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna waalidka, qofka masuulka ka ah ama qofka la socodka ah.

Waxaan oggolaaneynaa gaadiid caafimaad oo amaan ah Oo caymiska OHP ee adeega caafimaadka oo ay amartay maxkamad. Waxaa ka reeban haddii xubinku aad u socoto maxkamad ama dhageysiga ballanqaadka (haddii aanay jirin wax kale oo lagu bixiyo gaadiidka), ama haddii xubinku xabsi ku jiro.

Imaansho la'aanta

Imaansho la'aanta macnaheedu waa inaad raacin safarkii lagu qorsheeyay. Adiguna sida ugu dhaqsaha badan noogu sheegin inaan baajin safarka.

Tani waxay macnaheedu noqon kartaa:

- Waxaad baajisay safarka labo saac ka hor waqtigii aan ku soo qaadan lahayn.
- Adigu diyaar uma aadan noqon 15 daqiiqo ka hor waqtiga lagu qabtay inaad soo qaadato.
- Waxaad albaabka ka celisay daraawalka sababtoo ah uma baahnayn safarka. Ama aadan rabin in uu ku raaco darawalka ama bixiyaha.

Ka dib tiro imaansho la'aan ah, waxaan sameyn karnaa isbedel adeegeed (isbedel) xogtaada.

Isbedelka adeeggu wuxuu safarada mustaqbalka u dejiyaa shuruudo gaar ah iyo xaddidaadyo macquul ah (xaddidaadyo cadaalad ah). Waxay macnaheedu noqon kartaa in aad isticmaasho adeeg bixiye gaadiid oo cayiman. Ama isticmaal gaadiidka dadweynaha marka ay la heli karo. Ama horay noogu soo wac si aad u xaqiijiso safar kasta. Ama waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad la safarto qof ku kalkaaliye daryeelka caafimaadka (PCA). (Fiiri **Bogga 6** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan PCAs.)

Ma waxaad u maleyneysaa in gaarigaaga si khalad ah loogu calaamadeeyay imaansho la'aan? Waxaad la xiriiri kartaa kooxda adeegga macaamiisha si aad uga doodo (su'aasho) imaansho la'aanta. Waan eegi doonaa arinta. Haddii loo baahdo, waxaan ka saari doonaa imaansho la'aanta.

Carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo ka yar

Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano waa in uu la socdaa qof qaangaar ah. Qofka qaangaarka ah waa in uu ahaadaa waalidka, waalidka dhanka aabahaa mise dhanka hooyadaa, awoowe/ ayeeyo, masuulka sharciga ah, shaqaalaha ama mutadawiciinta Waaxda Adeegyada Aadanaha (Department of Human Services (DHS)) ama shaqaalaha Oregon Health Authority (OHA). Ama waxay noqon kartaa qof qaangaar ah (18 sano ama ka weyn) oo waalidka ama mas'uulka

sharcigu uu qoraal ahaan u aqoonsaday inuu yahay kalkaaliyaha daryeelka oo shaqsiga ah, ama PCA.

Qofka qaangaarka ah ee la socdaa waa inuu keenaa oo ku rakibaa kursiyada baabuurta ama kuraasta carruurta da'doodu ka yar tahay 8 sano. (Fiiri **Bogga 6** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan PCAs.)

Adiga kuma siin karno kuraasta baabuurta. Daraawalada baabuurta ma caawin karaan rakibidda ama ka saarida kursi baabuur. Waa in aad qaadataa kursiga gaariga marka aad gaariga ka baxayso. Darawalku gaariga dhexdiisa kuma hayn karo kursi.

Sida uu qabo sharciga Oregon:

- Ilmaha ka yar 2 sano waa inuu ku fadhiistaa kursiga baabuurka ee gadaal u jeeda.
- Imaha da'diisu tahay 2 sano ama ka weyn oo miisaankiisu ka yar yahay 40 kiilo waa inuu ku fadhiyaa kursiga gaariga.
- Ilmaha miisaankoodu ka badan yahay 40 pound waa inuu ku fadhiyaa kursiga kor u qaadista ilaa uu ka gaadho 4 fuudh, 9 inji, ama haddii ay ku xiran yihiin nidaam badbaado oo ay dowladdu oggolaatay.
- Baabuurku wuxuu ilmaha qaadi karaa oo keliya haddii uu haysto kursi baabuur oo ku habboon iyo qof la socda.



Goobaha farmashiyaha

Waxaan kaa caawin karnaa in aad farmashiyaha aado si aad u soo iibsato dawooyinka lagu qoro si loogu daro safarka aad horay u soo qaadatay. Joojinta waxay noqon kartaa in lagu daray ka hor ama ka dib ballantaada. Waxaan bixin karnaa lacagta gaadiidka baska, magdhawga masaafada ama safarka baabuurta.

Gawaarida baabuurta lagu raaco, waxaad kala dooran kartaa: Darawalku wuxuu sugi karaa 15 daqiiqo. Ama waxaad soo wici kartaa marka aad diyaar u tahay in lagu kaxeeyo.

Ma qorsheyneyno safarro aan caadi ahayn oo farmashiyaha ah. Si kastaba ha noqotee, waanu kuu qabanqaabin doonaa, haddii ay jirto baahi caafimaad.

Health Share iyo qorshahaaga caafimaadku waxay la shaqeeyaan bixiyeyaasha farmashiyeyaasha si ay kuu siiyaan ikhtiyaarka ah in daawooyinka lagu qoro si toos ah gurigaaga loogu keeno. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan fursadaha gaarsiinta, weydii qasnaddaada daryeelka caafimaadka ama rugtaada caafimaadka. Ama waxaad wici kartaa adeega macaamiisha Health Share lambarka 503-416-8090, lambarka bilaashka ah 888-519-3845 mise TTY 711.





Ka baxsan aagga

Ma u baahantahay safar aad ku tagto ballamo Kujira caymiska Health Share oo aan laga heli karin gudaha Clackamas, Multnomah ama degmooyinka Washington? Waan kaala shaqayn doonaa si aan u aragno haddii aan gaadiid u heli karno ballantaas. Mararka qaar, gaadiidka ka baxsan aaga waxaa ka mid ah magdhowga kharashka iyo gaadiidka baabuurka, iyadoo ay ku xiran xaaladdaada.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa OAR 410-141-3515 (a) iyo (b), 410-141-3930. Waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaalmada cuntada iyo hoyga Lacag celinta masaafada ee Ride to Care: careoregon.org/docs/default-source/nemt/hso-nemt-reimburse-guide-web.pdf

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aan bixino kaalmada cuntada iyo hoyga (lacag go'an oo ah lacag) adiga iyo qof kula socdo (fiiri faahfaahinta hoose). Lacagta kaalmada cuntada waxaa la siin karaa haddii daryeelkaaga caafimaad uu ka baxsan yahay aagaaga:

- Waxaa ku jira safar ka dheer 30 daqiiqo ama 30 mayl (haddii aad ku nooshahay magaalo).
- Waxaa ku jira safar ka badan 60 daqiiqo ama 60 mayl (haddii aad ku nooshahay baadiyaha).
- Waxay qaadataa afar saacadood ama ka badan safarka oo dhan.

Si aad ugu qalanto lacag celinta hoyga:

- Waa in aad safarka bilowdaa kahor 5 a.m. si aad ballanta u qabsato, haddii kale waxaad guriga ka soo noqonaysaa ka dib 9p.m.

MISE

- Daryeelahaaga caafimaadku waa inuu si qoraal ah noogu sheegaa baahidaada caafimaad.
- Labada xaaladoodba waa inaad sheegtaa magaca iyo cinwaanka meesha aad joogi doontid.

• **Cuntooyinka waxaa sidoo kale la heli karaa xaalado kale, sida:**

- Waxaad awoodaa in aad iskaa u soo qaadatid si aad u tagto meel ka baxsan goobtaada si aad u hesho daryeel.
- Xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib ayaa ku geyn kara ballan dhakhtar oo ka baxsan aagaaga.
- Waxaa lagu siinayaa gaadiid aad ku tagto meel aan aheyn goobta aad ku sugan tahay.

Fadlan nala soo xiriir si aad u ogaatid in xaaladaada ka baxsan aagga aad u qalanto cunto.

Kharashka cuntada iyo hoyga waxaa lagu magdhabaa heerarka soo socda ee xubnaha (iyo shaqaalaha, haddii ay khuseyso):

- Quraac (\$11): Safarka wuxuu bilaabanaa ka hor 6 a.m.
- Qado (\$11): Safarku wuxuu soconayaa 11:30 a.m. ilaa 1:30 p.m.
- Cashada (\$11): Safarku wuxuu dhamaadaa 6:30 p.m.
- Hooyga: \$98 Kharashka habeenkiiba. Kharashka hoyga kaaliyaha waxaanu u soo celinaa oo keliya haddii ay qol gaar ah ka helaan adiga.

Lacagta cuntadu waa lacag go'an. Uma baahnid inaad na siiso rasiidada cuntada.

Xubnaha waa inay bixiyaan kharashka ka badan kaalmada cuntada iyo hoyga ee la ogolaaday. Fadlan u qorsheeyso haddii lagu oggolaado kaalmada cuntada iyo hoyga. Haddii adiga ama qofka aad wakiilka ka tahay aad awoodi weydaan inaad bixisaan kharashaadka kale, wac Health Share oo weydii fursadaha aad u haysataan.

Waxaan leenahay nidaam aan ku qiimeyno codsiyada kharashaadka safarka ee daryeelka ka baxsan adeegeena aaga. Haddii horay loo oggolaado, waxaa laga yaabaa inaan magdhowno kharashaadka safarka qaarkood ama aan bixino gunno safar.

Fadlan na soo wac. Isla marka aad ballan ka qabsato daryeel caafimaad oo ka baxsan aagaagaaga, Waxaan u baahanahay waqti aan dib ugu eegno codsigaaga. Waxaan marka hore hubineynaa in ay caafimaad ahaan ku haboon tahay in aan ka baxno aagga adeega si aan kuu daryeelno. Haddii aan oggolaano safarkaaga dibada, waxaan u baahanahay waqti aan ku qabano safarkaaga.

Waxaad wici kartaa 90 maalmood kahor si aad u codsato safarka ka baxsan aagga. Waxaad haysataa ilaa 45 maalmood kadib waqtiga ballanta si aan u helno foomka lacag celina oo dhameystiran.

Markaad wacdo si aad u codsato safar aad ku tagto meel ka baxsan goobta adeegga, wakiiladeena Adeegga Macaamiisha waxay u baahan doonaan macluumaad.

Macluumaadkani wuxuu naga caawinayaa go'aaminta in safarku uu ku jiro xeerarka caymiska ee ka baxsan aagga ee ay dejisay Oregon Health Authority. Waxaan waydiinaynaa:

- Ciwaanada dhameystiran ee halka laga tagaayo iyo halka lagu degaayo, oo ay ku jiraan guryaha iyo nambarda qolka (haddii taasi khusayso).
- Magaca xarunta, magaca bixiyaha iyo lambarka telefoonka bixiyaha
- Sababta ballamaha.
- Taariikhda iyo wakhtiga ballamaha.
- Marka aad u baahato inaad timaado. Tani waxay noqon kartaa maalinta ka horeysa waqtiga lagu qabtay.
- Mudo intee le'eg ayaad u baahan tahay inaad joogto.
- Haddii aad haysan doonto qalab socodka ama kaaliye daryeelka shakhsiga ah
- Nooca gaadiidka aad dalbaneyso. (Tusaale ahaan baabuurta, safarka hawada ama lacag celinta masaafada.)
- Lanbar wanaagsan oo dib kuugu soo wacaya.

Waxaan kula soo xiriiri doonaa markii aan dib u eegno oo aan xaqiijino macluumaadka safarka. Waxaan ku ogeysiin doonnaa in safarkaaga la oggolaaday iyo in kale.

Haddii safarkaaga la oggolaaday, waxaan ku siinaynaa faahfaahinta gaadiidkaaga. Waxaan kuu diyaarinaynaa kaarka.

La safrida kaaliye meel ka baxsan aagga

Waxaan dib u bixinaa kharashaadka cuntada iyo hooyga ee hal kaaliye. Waxaa ka mid noqon kara waalidiinta ama dad kale ee caawinaya qofka xubinka ah. Waxaan xubnaha u soo celineynaa kharashka la socoshada marka:

- Xubinku uu yahay qof aan qaangaarin oo aan safri karin qof kale la'aantiis.
- Qofka xubinta ah uu haysto warqad uu saxiixay dhakhtarkiisa sharaxaysana sababta ay u tahay in qof kale uu la safro.
- Sababo maskaxeed ama jir ahaaneed awgeed aanay caawimaad la'aan u imaan karin ballanta.
- Xubinku gurigiisa u soo noqon karin ka dib ballanta, daaweynta ama adeegga caawimaad la'aan.

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aan go'aansano in aan magdhawno cuntada ama hoyga in ka badan hal kaaliye, ama sababo kale oo aan ahayn kuwa kor lagu soo sheegay.

Haddii adiga iyo/ama qofka kula shaqeeya aad awoodi weydaan inaad bixisaan kharashka cuntada iyo hoyga, fadlan noo soo sheeg. Waxaan kuu heli doonnaa xulashada ugu fiican.



Gurmadka deg degga ah

Haddii aad la kulanto xaalad caafimaad oo degdeg ah, fadlan wac lambarka 911, ama qof ku geeyo qolka gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow.

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah inta aad safarka ku jirto, fadlan ogeysii darawalkaaga. Darawalka ayaa wici kara 911.

U fuulida Daryeelka ma bixiso gaadiid degdeg ah.



Baaritaanka daraawalka

Waxaan baaraynaa darawallada. Waxay maraan hawlo ka hor inta aan la shaqaaleysiin oo ay ku jiraan baaritaanka dembiyo hore iyo baaritaan si loo hubiyo in aan laga saarin ka qeybgalka barnaamijyada federaalka. Shaqaaluhu waa inay buuxiyaan shuruudo gaar ah oo ay ka mid yihiin in ay haystaan laysanka baabuur wadista oo ay ku qoran yihiin calaamadaha saxda ah, haddii loo baahdo. Adeegyada gaadiidka waxaa lagu bixiyaa oo keliya baabuurta buuxiya heerarka badbaadada iyo raaxada qaarkood. Waxay bixiyaan waxyaabo ay ka mid yihiin suumanka badbaadada, qalabka dab damiska iyo xirmooyinka gargaarka degdegga ah. Gawaarida waa kuwo aan qiiq lahayn, jeermis lahayn, la nadiifiyey, oo aan qashin lahayn oo buuxiyayna dhammaan shuruudaha liisanka iyo ruqsadaha maxalliga ah.



Qorshaha cimilada xun

Waxaan leenahay qorshe aan kuugu adeegno haddii aad u baahato daryeel caafimaad oo degdeg ah inta lagu jiro xaaladaha cimilada ee daran. Daryeelka caafimaadka ee muhiimka ah waxaa ka mid ah dhaqida kelyaha, daaweynta kiimikooyinka iyo waxyaabo kaloo badan. Cimilada xun (aad u xun) waxaa ka mid ah kuleyl aad u daran, qabow aad u daran, daadad, digniino duufaan, baraf culus, waddooyin baraf ah iyo waxyaabo kaloo badan.





Xuquuqahaaga iyo waajibyadaada

Rakaabka Ride to Care waxay xaq u leeyihiin in ay:

- Helaan gaadiid aamin laiskuna halleyn karo oo adiga kugu habboon.
- In aad hesho adeegyada turjumaadda.
- Hel qoraal ku qoran luqaddaada ama qaabka aad u baahan tahay.
- In aysan ku takoorin darawallada Ride to Care, shaqaalaha ama rakaabka kale.
- U soo qaado xayawaan ama qof ku caawiya haddii loo baahdo. Fadlan ogeysii xarunta telefoonka in aad qorsheyneyso in aad keensato qof kaa caawiya ama xayawaan.
- Haddii loo baahdo, waxyaabo yar ayaad la imaan kartaa, lkn aanay badneyn. Tusaale ahaan waxaad keeni kartaa:
 - Saddex boorso oo kuwa adeega cunnada ah, ama
 - Hal sanduuq oo cunto ah, ama
 - Laba shay oo aad ku qaadan karto alaabta
- Lugu qaado qalab socodka ee aad adigu dooratay (sida saladda la riixo).
- Codso in lagaa caawiyo inaad xirato suunka badbaadada ama aad dheereysato suunka.
- Ku hesho adeegga waqtigii loogu talagalay.
- Gudbiso ammaan ama ka tabashooyin ku aadan adeegaaga.
- Aad xareysato racfaan ama garmaqal codsato (ama labadaba) haddii aad dareento in si aan caddaalad ahayn laguugu diiday adeega.
- Lagu siiyo gaysiis qoraal ah haddii safarka lagaa diido.

Waxaan ka fileynaa rakaabka Ride to Care in ay:

- Ixtiraamaan dhammaan shaqaalaha Ride to Care, darawalada iyo rakaabka kale. Lama oggola hadalka iyo dhaqanka aflagaadada ama cabsi gelinta ah.
- Qaadato alaabtaada oo dhan marka aad gaariga ka soo degayso, xitaa haddii aad u maleyneyso in isla baabuurku ku soo qaadi doono. Baar fadhiga iyo sagxadda hareerahaada si aad u ogaato waxyaabahaaga gaarka ah.
- Oggolaato inaad xayawaanada aad adeega ka siineyso mar walba xakameyso. Xayawaanka adeega looma oggola kuraasta rakaabka.
- Xayawaanka ku caawiya dareenkaaga ku hay meel gaar ah.
- Horay u soo wac haddii aad u baahato inaad safar bedesho ama aad baajiso. Fadlan wac Ride to Care lambarka 503-416-3955 ama 855-321-4899 sida ugu dhaqsaha badan uguna hormarsan.
- u sheegto xarunta telefoonka haddii aad u baahantahay meel kale oo aad istaagto, sida farmashiyaha, Waa in aad horay u weydiisataa in aad istaagto. Daraawalada waxay joojin karaan oo keliya meelaha horay loo oggolaaday.
- Diyaar u noqoto in lagu qaado waqtiga ay Ride to Care ku siisay. Waqtiga ku imaanshuhu wuxuu ka caawiyaa qof walba in sidii la rabay ay wax ku socdaan: Adiga, Darawalka iyo kuwa kale ee raacay
- Oggolaataa inaad daroogaysaneyn ama soo cabin ama ku cabin khamri gudaha gaariga Ride to Care.
- Oggolaataa inaad sigaar ku cabbin gudaha ama meel u dhow baabuurta Ride to Care ama darawalada. Fadlan ka fogaada gaariga ugu yaraan 25 tallaabo.
- Oggolaataa wax sharci darro ah ku samayn baabuurta Ride to Care dhexdiisa ama meel u dhow ama darawallada, ama xubnaha kale.

- Xirato suunka badbaadada, si waafaqsan sharciga Oregon.
- Oggolaataa inaad raacdo xeerar dheeraad ah oo ku saabsan xaaladaha caafimaad ee degdegga ah, sida xirashada maaskarada.
- Ku lug laheyn dhaqan takoorid ku ah darawalada Ride to Care ama shaqaalaha, ama rakaabka kale.
- Aad keento cabirka saxda ah ee kursiga badbaadada ee ku habboon ilmaha kula safraya. Waxaad rakibaysaa kursiga kadibna ilmaha ayaad kursiga ku ilaalineysaa. Fadlan ka saar kursiga badbaadada ilmaha gaariga dhamaadka safar kasta. Ha ku darin waxyaabo shakhsi ahaaneed baabuurka dhexdiisa.
- Horay u sii qorsheeyso oo soo qaado cunto (marka meel la istaago) iyo daawo lacalla haddii safar dheer ama dib u dhac lama filaan uu dhaco.
- Sii Ride to Care iyo bixiyeyaasha gaadiidka. macluumaad sax ah Tani waxay hormarin doontaa adeegga aad hesho.

Haddii aad u baahantahay inaad istaagto farmashiyaha ama goob kale, waa inaan ogolaanaa taas. Daraawalada waxaa loo ogol yahay inay sameeyaan istaagyo aan oggolaano oo kaliya.

Isbedelledda adeega

Xubnaha qaarkood waxay leeyihiin xaalado ama baahiyo gaar ah. Waxaa ka mid noqon kara Caafimaadka jirka ama dhibaatooyin dhanka dabeecadaha ah. Waxaan wax ka beddeli doonaa (hagaajin doonaa) adeegyada NEMT si ay u waafaqsanaadaan xeerarka OAR 410-141-3955. Waxaan sidoo kale wax ka beddeli doonaa adeegyada loogu talagalay rakaabka qaba xaaladaha caafimaad ama kuwa soo bandhigaya dabeecado u horseedi kara darawalka ama dadka kale ee safarka ku jira khatar toos ah ama khatar badbaado.

Khataraha nabadgelyada waxaa ka mid ah:

- U hanjabidda darawalka gaariga.
- U hanjabidda dadka kale ee gaariga saaran.
- Abuuridda xaalad qof kasta oo gaariga saaran uu khatar ugu jiro inuu wax yeelo.

Waxaa sidoo kale laga yaabaa in adeegga loo bedelo rakaabka adeegga si khaldan u isticmaala. Adeegyada ayaa sidoo kale la bedeli karaa marka dabeecadda rakaabka ay keento in bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku ay diidaan adeegyada ku saleysan arrimaha gaadiidka.

Haddii aad hesho isbeddel ku yimaada adeegga, qaab qoraal ah ayaa lugugu wargelin donaa annaguna waanu kula shaqayn doonaa. Waxaan raadin doonaa fursado kale oo kaa caawinaya in aad hesho daryeelka caafimaadka.

Biilka

Annaga iyo Health Share midkoodna laguma soo dalban karo kharashka gaadiidka ee adeegyada caafimaad ee caymiska, xitaa haddii aan lacag celin adeegyadaas ah ka helin Oregon Health Authority (OHA). Haddii aad hesho biil, fadlan si degdeg ah noo soo wac ama Health Share.



Lacag bixinta dheeraadka ah

Mararka qaar, waxan ku siinaa wax ka badan inta lagaa rabo. Tan waxaa loogu yeeraa lacag bixinta dheeraadka ah. Tani waxay dhici kartaa marka:

- Lacag celin kuu sameyno, laakiin hay'ad kale ama qaab kale lacagta lagugu celiyay.
- Qofkii ku siiya gaadiidka, cuntada ama hoygaaga ayaa si toos ah loo siiyay lacagta, laakiin adna sidoo kale lacagta ayaa luguu soo celiyay.

- Lacagta aad ballanta ugu safreyso ayaan ku siineynaa, laakiin adiga:
 - Ha isticmaalin lacag.
 - Ha aadin ballanta.
 - La wadaag gaadiidka xubin kale oo sidoo kale lacagta loo soo celiyay.
- Waxaan ku siineynaa kaararka gaadiidka dadweynaha, waxaadna ka iibisaa ama u wareejisaa qof kale.

Haddii mid ka mid ah lacagaha dheeraadka ah la bixiyo, waxaan na loo ogol yahay inaan kaa qaadno lacagta dheeraadka ah.



Tabashooyinka, jawaab celinta, diidmooyinka iyo racfaanada

Tabashooyinka iyo jawaab celinta

Daryeelka caafimaadka ee Health Share iyo gaadiidka daryeelayaashu waxay rabaan inay ku siiyaan daryeelka ugu fiican oo ugu macquulsan. Ma jiraan wax cabasho ah oo aad ka qabtid adeegyada gaadiidka (safarka)? Waad soo wici kartaa ama waad noo soo qori kartaa si aad noogu sheegto ama aad ugu sheegto Health Share.

Waxaad xaq u leedahay inaad tabasho ka gudbisno dhinac kasta oo ka mid ah adeegyadeena, howlaheena ama safaradeena. tabashadu waxay muujisaa qanacsanaan la'aanta. Kooxdayadu waxay ka shaqayn doonaan wax ka qabashada walaacyadaas.

Tabashooyinka waxaa laga yaabaa inay ku saabsan yihiin waxyaabo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn:

- In lagu diiday adeeg.
- Nabadgelyada darawalka ama gaariga.
- Tayada adeegga aad heshay.
- Darawalka baabuurka ama shaqaalaha baabuurka oo aan edeb lahayn.

- Haddii aad heshay nooca adeeg ee kugu haboon.
- Hellidaada adeegyada.
- Xuquuqahaaga macaamiil ahaaneed.

Yadeegyadaada NEMT saameyn xun kuma yeelan doonto haddii aad dacwad soo gudbisno. Waa muhiim in aan maqalno tabashooyinka si

Aan u bixino adeegyo tayo leh.

Tabasho ayaad soo gudbin kartaa adigoo wacaya Ride to Care inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga. Waxaan sidoo kale soo dhaweynaynaa jawaab celinta kale.

Shan maalmood oo shaqo gudahood markii Ride to Care ay hesho cabashadaada, waxaanu kuu soo diri doonaa mid ka mid ah laba waxyaalood: (go'aanka). ama warqad aad ku sheegto in aan u baahanahay waqti dheeri ah si aan u baarno arintaada.

Jawaabta kama dambaysta ah waxaan ku siin doonnaa 30 maalmood gudahood.

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka ama ogaanshaha sida loo sameeyo?

Health Share ayaa ku caawin karta Wac adeegga macaamiisha 503-416-8090, bilaashka ah 888-519-3845 ama TTY 711.

Waxaad sidoo kale:

- Si toos ah ula xiriir kartaa dhakhtarkaaga si aad ugala hadasho walaacaaga.
- Cabasho u gudbi OHP clients services. Wac lambarka bilaashka ah OHP 800-273-0557.
- U gudbi cabashadaada Oregon Health Authority Ombudsman. Wac lambarka bilaashka ah ee OHA ah 877-642-0450 ama TTY 711.

Wakiilkaaga (qofka aad oggolaatay inuu kuu shaqeeyo) ayaa dacwad kuu gudbin kara asaga oo ku matalaya. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato inaad Ride to Care (si qoraal ah ama cod ahaan ah) u sheegto in aad oggolaaneyso in wakiilku uu cabasho gudbiyo.

Annaga iyo Health Share kaama hor istaagi karno inaad soo gudbiso cabashooyin ama cabashooyin aad horay u soo gudbisay. Waxaan sidoo kale kaa hor istaagi doonin inaad sameysid ama aad gudbiso cabasho isku mid ah ama isla icabasho noo soo gudbiso annaga iyo Health Share.

Diidmada iyo racfaanka

Haddii aad dareentid in si aan caddaalad ahayn lagu diiday adeegga, waxaad xaq u leedahay racfaan, dhageysi ama labadaba. Haddii lagu diido adeeg, waxaan si afka kuugu sheegeynaa sababta codsiga loo diiday. Ka hor inta aan lagu soo dirin Notice of Adverse Benefit Determination (NOABD), Health Share waa inay bixisaa dib u eegis labaad oo ay sameeyaan shaqaale kale marka baaraha koowaad uu diido safarka.

Gudaha 72 saacadood ee diidmada, Health Share waa inay kuu soo dirto Notice of Adverse Benefit Determination (NOABD), (Xubinta gaariga loo diiday). Waxaa sidoo kale nuqul u diri doonaa bixiyaha daryeelka caafimaadka ee aad ballanta ka qabsatay, haddii ay kuu qabteen safarka. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada

waxaad ka heleysaa bug-gacmeedka xubinta.

Waa in aad mar walba isku daydaa in aad xalliso walaacyadaada anagoo si too as noo soo mareyso. Si kastaba ha ahaatee, haddii aan Haddii aan xallin karin walaacaaga, waxaad la xiriiri kartaa Adeegga Macaamiisha ee Health Share taleefanka 503-416-8090, ama adeegyada xubinta ee Oregon Health Authority taleefanka 800-273-0557.

Haddii aan diidno, joojino, ama yareyno adeegyada NEMT ee aad codsatay, ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadku uu ku codsaday magacaaga, waxaan 72 saacadood gudahood kuu soo diri doonaa warqad NOABD, ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah ka hor inta uusan isbedelku dhicin. Ogaysiiska ayaa kuu sheegi doona sababta aan go'aankaas u gaarnay.

Warqadda waxaa laguugu sharixi doonaa sida aad racfaan uga qaadan karto go'aanka, haddii aad dooneyso. Raac habka tilmaamaha eek u qoran warqad NOABD si aad u bilaawdo racfaanka iyada oo loo marayo Wadaagista Health Share. Waa in aad racfaanka ku gudbisaa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ku qoran warqad NOABD.

Haddii aad dooratid in aad racfaan qaadato, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee leh khibrada caafimaad ama barnaamij u leh xaaladda ayaa dib u eegi doona. Health Share waxay kuu soo diri doontaa Wargelinta Notice of Appeal Resolution (NOAR) sida ugu dhakhsaha badan ee xaaladdaada caafimaad ay u baahan tahay. Waxaa lagu soo dirayaa ugu dambeyn 16 maalmood kadib markii aad codsigaaga gudbisay. Haddii Health Share u baahato waqti dheeraad ah, waxay kuu soo diri doonaan warqad. Waxay heysan karaan ilaa iyo 14 maalmood oo dheeraad ah.

Haddii Health Share aysan racfaankaada ka shaqeynin 16 maalmood gudahood ama waqtiga la kordhiyay ee racfaanka, tani waxay ka dhigan tahay in racfaanka shaqadiisa la dhammaystiray. Markaas kadib waxaad codsan kartaa dacwad maamul. Uma baahnid inaad gudbiso cabashadaada ama racfaankaada. Haddii aad dooneysid, wakiilka aad oggolaatay aya mid kuu gudbin kara.

Waxaa kuu sii socon kara helitaanka adeegga aad bilowday ka hor go'aankeena diidmada, joojinta ama yareynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamyada cabashooyinka iyo racfaanka, sharciyada iyo hababka, fadlan wac:

Telefoonka: 503-416-8090

Bilaashka ah: 888-519-3845 ama TTY 711

Waxaad sidoo kale heli kartaa caawimaad sharci oo lacag la'aan ah adigoo maraya Xarunta Sharciga ee Adeegyada caawimaada Sharciga ee Oregon. La xiriir lambarka manfacyada dadweynaha ee 800-520-5292 ama TTY 711 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

U adeegidda baahiyahaaga

Sidee Ride to Care, bixiyeyaashaada, iyo Oregon Health Authority ay iskugu xiran yihiin



Oregon Health Authority (OHA) waxay maamushaa barnaamijka Medicaid ee gobolka Oregon oo dhan, kaas oo lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP). Gaadiidka caafimaadka ee aan degdegga ahayn (NEMT) waa manfac ah caymiska OHP.

Health Share of Oregon (HSO) waxaa loo yaqaanaa ururka isuduwidka daryeelka (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha OHP ee aagga saddexda gobol (Clackamas, Multnomah iyo gobollada Washington).

CareOregon, Kaiser Permanente, Legacy Health/ PacificSource, OHSU iyo Providence Health & Services waa bixiyeyaasha caymiska ee aagga saddexda gobol ee caawiya Health Share CCO bixinta daryeelka. Iyadoo loo maraayo adeega macaamiisha iyo kooxaha is duwidka daryeelka, waxay kaa caawinayaan inaad hesho daryeel caafimaad oo xagga jirka, ilkaha iyo maskaxda ah iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha. Adeegyada gaadiidka waxay ku hoos jiraan qorshaha caafimaadka.

Ride to Care waxay kaa caawinaysaa inaad hesho daryeelka caafimaadka iyo adeegyada ay Health Share bixiso. Ride to Care ayaa kaa caawin doonta helitaanka adeegga NEMT ee ku haboon baahidaada. Tani waxay noqon kartaa lacagta gaadiidka safarka ee gaadiidka dadweynaha, lacag celinta masaafada safarka ama baabuurta ay bixiyaan. Ride to Care waxay sidoo kale la xiriiri kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si ay u xaqiijiyaan in aad ka qeybqaadaneyso adeegyada caymiska ee Medicaid.

Your primary care provider (PCP) Wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliye caafimaad, caawiye dhakhtar ama dhakhtarka daawooyinka dabiiciga. Waxay daryeelkaaga kala shaqeeyaan CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka, farmashiistayaasha iyo kuwa kale. PCP gaaga ama bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ayaa sidoo kale kaa caawin kara diyaarinta gaadiidka.



Lined writing area on the left side of the page.

Lined writing area on the right side of the page.





503-416-3955 mise lambarka bilaashka ah **855-321-4899**
8 subaxnimo. ilaa 5 galabnimo. Isniin ilaa iyo jimco

OHP-HSO-24-3527 SOM

HSO-23643345-EN-0109

[ridetocare.com](https://www.ridetocare.com)